

# NSW FIRE BRIGADES



## LIISKA – AMMAANKA DABKA JIKADA

Fact Sheet 33 – Community Risk Management. Revised 1/11/2005.

### XAQIIQ

45% dabka guryuhu wuxuu ka bilowdaa jikada. Intii lagu jirey 2004/5 dabdemiska NSW waxay tageen 1955 dab oo jiko ka dhacay, 988 waxaa dhaliyey wax la karinayey oo lagaga tegay dabka.

Tirakoobkani NSWFB waa sax laga bilaabo 30/6/2005

### DABKA JIKADAADU AMMAAN MIYAA?

Ammaanka ugu sareeya ee dabka jikada ka dhaca waxaan ku tallineynaa waxan soo socda:

- Waxa la karinayo oo lagaga tago dabku wuxuu dhalin karaa dab, haddii ay tahay inaad ka tagto jikada adoo wax karinaya demi saxanka kulul ee aad wax ku karineyso.
- Xiro dhar leh gacmo dhaadheer oo ku le'eeg markaad wax karineyso.
- Ka fogee carruurta saxanka kulul ee wax lagu karinayo iyo ofanka markaad wax karineyso, ka feker inaad ku xirto ilaaliyaha cunto kariyaha (stove).
- Tuwaalada shaaha, daabka ofenka iyo waxyaalaha kale ee gubanaya waa in laga dheereeyaa cunto kariyaha ama dushiisa sare wax lagu kariyo.
- U isticmaal saliida wax lagu kariyo si taxadar leh, u kululee si tartiib ah isticmaalna dheriga wax lagu karinayo oo xajmigiisu sax yahay kululeykana yaree si aad isaga dhawrto inay saliidu duulduusho.
- U wareeji daabka dheriga iyo maqlaha wax lagu dubo dhinaca gudaha si aan gacanta loogu dhufan.
- Nadiifi meesha wax lagu dubo ee cunto kariyaha isticmaal kasta ka dib u nadiifina faltarada oo dhan iyo dhammaan qalabka jikada si joogta ah.
- Biyuhu ma demiyaan dabka saliidu dhaliso- weligaa biyo ha ku shubin saliid gubaneysa. Biyaha lagu shubaa dabkan oo kale waxay keeni kartaa inuu dabku u fido si dhakhsa ah iyo inuu sidoo kale keeno dhaawac gubasho khatar ah.
- Ku xir dab demiska iyo bustaha dabka jikada barano sida loo isticmaalo. Waa inay yaaliin meel u jirta ugu yaraan 1 mitir cunto kariyaha inta u dhaxeysa marinka laga baxo ugu dhow iyo cunto kariyaha.
- Ka feker inaad ku xirto gogol oo aan lagu siinaynin cunto kariyaha hareerahiisa iyo meesha weelka lagu dhaqo.
- Haddii saliida wax lagu karinayaa dabku qabsado, demi saxamada kulul ee wax lagu karinayo kuna daboolkana ku yara leexi waxaad wax ku karineysay ama isticmaal bustaha dabka si aad dabka ugu yareyso. Ha u qaadin guriga dhexdiisa dheri gubanaya ama saliid gubaneysa maadaama tani fidin karto dabka oo ay keeni karto dhaawacyo khatar ah. u ogolow inay saliidu qabowdo ka hor intaadan daboolka ka qaadin maadaama laga yaabo inay saliidu dib u shidanto.
- Haddii dabka jikadu dhaco da' weyni awgeed ama sababo kale oo aadan ku kalsooneyn inaad iskudaydo demintiisa, demi qalabka, ka bax markaas oo uga wac Dab Demiska saddexda eber (000) taleefan ammaan ah.
- hubi in qalabka wax karinta la demiyoo isticmaal ka dib.

**Wada shaqeynta Dab Demiska NSW, Adeega Dabka Baadiyaha ee NSW,**

**Dab Demiska ACT iyo Adeega Dabka Baadiyaha ee ACT**

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH LA XIRRIIR SALDHIGA DABKA EE XAAFADAADA AMA XARUNTA**

**KONTOROLKA DABKA**

**Ama gal: [www.fire.nsw.gov.au](http://www.fire.nsw.gov.au) [www.rfs.nsw.gov.au](http://www.rfs.nsw.gov.au) ama [www.esa.act.gov.au](http://www.esa.act.gov.au)**

### Tallooyinka kale ee Ammaanka

- Hubi in dhammaan qalabka korontadu ay dhammaan si fiican u shaqeynayaan
- Waxaa la helayaa saacado dabka sheega oo khaas ah oo jikada loogu talagalay, ka feker rakibashada mid laakiin ka digtoonow dhawaaqa dabka ee beenta ah uumiga ka soo baxaya cuntada la karinayo awgeed.

**GARGAARKA DEG DEGGA AH WAC 000**